Caddad Gaar ah oo ku Aaddan Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliya

Warside wadajirka ay u soo saareen UNICEF/WHO Somalia Luulyo 2009

Dadaal dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo wanaajiyo badbaadada carruurta Soomaaliyeed

Waxaa qorey
UNICEF iyo WHO, Somalia

Horumarka laga sameeyey gaaritaanka Yoolasha Kun-Sanadka ee Qaramada Midoobey ee yareynta geerida carruurta iyo hooyada ayaa gaabis ah. Geerida carruurta iyo hooyada ayaa weli sarreysa iyada oo soo gaaritaanka badi waxqabyada caafimaadka dadweynaha ee ugu waxtarka badan ay weli yihiin kuwo aad u hooseeya ayna waqti dheer qaadaneyso in wax laga beddelo. Iyada oo lix sano oo keliya ay ka harsan tahay sanadkii la rabey in la gaaro yoolka kun-sanadka ee 2015, ayaa si degdeg ah loogu baahan yahay dadaallo waaweyn oo cusub oo kor loogu qaadayo laguna joogteynayo soo gaaridda iyo saameynta waxqabadyada aasaasiga ah ee caafimaadka, biyaha, fayadhowrka iyo nafaqada.

Barnaamijka wadajirka ah ee UNICEF iyo WHO ee Dardargelinta Badbaadada Carruurta Yaryar ee Soomaaliya ee sanadaha 2008-09, ayaa ka dhigan bilowga dadaalka noocaas ah. Waxaa uu ku fadhiyaa xaqiiqo caalami ah oo sayniska lagu ogaaday iyo waayo-aragnimo laga heley sanado badan oo

Gabar la tallaalayo waqtigii Ololihii Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliya. © UNICEF Somalia/2009.

xaaladaha Soomaaliya faraha lagula jirey. Barnaamijkan Wadajirka ah waxaa uu ka kooban yahay tiro waxqabadyo aasaasi ah oo aan kharashkoodu badneyn oo dadka la gaarsiinayo iyada oo loo marayo istiraatiijiyado kala duwan oo hore loo tijaabiyey si loo gaaro ilmo kasta oo ku nool dhammaan degmooyinka dalka Soomaaliya.

Barnaamijkan waa mid ku jiheysan xaqiijinta natiijooyinka oo dhinacyo badan taabanaya (caafimaadka, biyaha, fayadhowrka iyo quudinta).

Waa dadaal ogaal ku dheehan oo lagu yareynayo is-dhexyaaca laguna badinayo ka faa'iideysiga kheyraadka gabaabsiga ah iyo waayo-aragnimadii hore loo heley; waxa uu mideynayaa maaliyadda iyo muruqa iyo maskaxda si si weyn loogu yareeyo geerida carruurta shan jirka ka yar ee Soomaaliya iyo si loo taageero in la horumariyo nidaamyada caafimaadka ee ka dhigaya gaaritaanka yoolka lagu yareynayo geerida carruurta mid suurtagal ah oo la joogteyn karo.

Carruurtu waa mustaqbalkeena – badbaadadooda, wanaaggooda iyo horumarkooda ayaana fure u ah in la helo mustaqbal wanaagsan. Soomaaliya waxa ay hoy u tahay malaayiin carruur ah oo caafimaadka iyo waxbaashada aasaasiga ah ee ay heli karaan ay yar yihiin kuwaas oo la silcaya cudurro laga hortegi karo sida shubanka, jadeecada, duumada iyo oof-wareenka; iyo nafaq-xumo. Dalka Soomaaliya, toddobadii carruur ah ee shan sano jir ka yariba mid ayaa dhimanaya. Ma ahan in carruurtu ay dhintaan marka waxqabadyo aan qaali ahayn oo la xaqiijiyey la garanayo oo haddii la bixiyana si taabogal ah nafo loogu badbaadin karo.

Eeg bogga 8aad

Maxay carruurtu ugu dhintaan Soomaaliya?

Dadka Soomaaliya ku nool waxaa lagu qiyaasey 8.5 milyan – laakiin qofna ma hubo tiradaas maaddaama tirakoobkii ugu dambeeyey la sameeyey 1970-naadkii! Dadka ayaa ku baahsan dalka oo aad u baaxad weyn oo ah mid ka mid ah dalalka iskucufnaanta dadku ay aad u yar tahay dunida oo dhan. Badi dadku waxa ay ku nool yihiin magaalooyin tiro yar – laakiin saami isna aan yareyn ayaa ku baahsan degaannada miyiga ah. Ka dib markii sanado badan ay socdeen iskahorimaadyo, ayaa dadku ay aad u sabooleen oo ayna aad ugu nuglaadeen dhibaatooyinka ku-soo-boodka ah – abaaraha, dhibaatooyinka maaliyadeed, kor u kaca qiimaha cuntada iyo shidaalka. Intaa waxaa dheer in ay si buuxda u burbureen hay'adihii iyo hawlihii caadiga ah ee dadweynaha – sidaa daraaddeedna kaabayaasha ayaa aad u liita iyo nidaamka caafimaadka dadweynuhuna qaab ma lahan.

Warbixintii Horumarka Aadanaha ee ay UNDP soo saartey sanadkii 2000 ayaa Soomaaliya ahayd dalka ugu hooseeyey dhammaan tilmaamayaasha caafimaadka marka laga reebo cumriga dadku ay gaaraan. Warbixintii Horumarka Aadanaha ee ugu dambeysey, dalka maba lagu soo qaadin, sababtuna waa xog la isku haleyn karo oo aan la heli karin. Natiijada arrintaa ka dhalateyna waa in "Badi dadka Soomaalida ah ay badi wakhtigooda ku bixiyaan iyaga oo isku dayaya sidii ay u noolaan lahaayeen oo qoysaskooduna ay u sii noolaan lahaayeen" (UN, 2005). Dad weynaha Soomaaliyeed ayaa qiyaastii 43% ay haysataa saboolnimo aad u xun, reer magaalku waa 23% reer miyiga iyo reer guuraaga waa 53% (UNICEF, 2001). Ugu yaraan 80% dadka ayaa lagu qiyaasey in ay yihiin kuwo aan wax akhrin waxna qorin (65% reer-magaalka iyo 89% reer miyiga).

Eeg bogga 2aad

CADDADKAN KA AKHRISO

Maalmaha Caafimaadka Carruurta	2
Culaysyada daryeelka caafimaadka	2
Waxqabyada Nafaqeynta ee Naf-badbaadinta	3
Mucaarad isu-beddeley halyeygii tallaalka	4/7
Kacaanka badbaadada carruurta	5
Abaabulka dadka maalmaha caafimaadka carruurta	6
Soomaaliya— gaaritaanka maalmaha caafimaadka carruurta	7
Hirgelinta maalmaha caafimaadka carruurta	8
Nagala soo xiriir	8

Geerida carruurta iyo hooyada ayaa aad ugu badan Soomaaliya…

UNICEF ©Carruurteenna

Maalmaha Caafimaadka Carruurta

Iyaga oo kaashanaya maamullada degaamada, ayaa UNICEF iyo Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) ay fulinayeen ololayaasha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliya si ay uga ilaaliyaan carruurta shan jirka yar cudurrada laga hortagi karo iyo xannuunada biyaha ka dhasha. Waxaa ay sidoo kale ka shaqeeynayaan yareynta nafaqo-xumada iyo ka-ilaalinta haweenka ee teetanada marka ay umulayaan. Waxqabadyada waxaa ka mid ah tallaalka jadeecada, qummanka, xiiq-dheerta, kojiyaha (teetanada) iyo dabayasha iyo sidoo kale bixinta Fitamiin A dheeri ah, goryaan ka-dilid, iyo kuwo kale. Muddada lagu jiro Maalmaha Caafimaadka Carruurta boqolaal kooxood ayaa olole ugu baxa degaannada magaalada iyo miyigaba iyaga oo rugo tallaal ka sameeya goobaha caanka ah ee bulshada iyo sidoo kale dugsiyada, xarumaha caafimaadka iyo hareeraha masaajidda. Ixsaa'iyaadka (istaatistikada) iyo dhulka la gaarey ka eeg khariidadda iyo shaxda ku yaalla bogga 8aad.

Culaysyada haysta in daryeel caafimaad la siiyo carruurta iyo haweenka Soomaaliya

Waa ay adag tahay waana qaali in daryeel caafimaad lagu bixiyo Soomaaliya. Nabadgelyo xumada iyo deegaanka laga shaqeeyo ee aan la saadaalin karin badi dalka, kaabayaasha liita, dadka ay ka mid yihiin reer-guuraaga ee dhulka ku baahsan, tirada dadka tababaran oo kooban iyo xarumaha caafimaadka ee shaqeeya oo yar ayaa ka mid ah culaysyada haysta bixinta adeegyada.

Nabadgeyo-xumada iyo gaaritaanka dadka ayaa weli ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan natiijooyinka laga gaari lahaa carruurta. Shaqaalaha caalamiga ah iyo kuwa dalka ee UNICEF iyo WHO ayaa kormeerayey tababarka iyo fulinta Maalmaha Caafimaadka Carruurta mar kasta oo dhulka la tegi karey min Awdal iyo Togdheer oo waqooyiga-galbeed ku yaalla ilaa Gaalkacyo iyo Garowe oo waqooyiga-bari ku yaalla, Bu'aale, Baydhabo, Jowhar iyo Waajid oo ku yaalla Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya. In kasta oo shaqaalaha UNICEF laga soo abaabuley dhammaan barnaamijyada kala duwan si ay taageero kasta oo suurtagal ah u siiyaan Maalmaha Caafimaadka Carruurta, haddana gaaridda dhulka ayaa weli sii ahayd culays jira.

Maaliyadda Maalmaha Caafimaadka Carruurta oo aan marka horeba dad ku filneyn ama mar dambe la helo ayaa saameyn ku yeelata qorshaha lagu doonayo in adeegyadan lagu bixiyey lixdii biloodba mar. Waxaa la aaminsan yahay in marka la soo dhammeystiro wareegga koowaad oo laga wadafuliyo dhammaan soononka (Waqooyi-galbeed, Waqooyi-Bari iyo Bartamaha/Koonfurta) Soomaaliya, UNICEF iyo WHO waxa ay awood u yeelan doonaan in ay dib u eegaan kharashka dhabta ah ee ku baxay noocyada kala duwan ee adeegyada iyo kharashka ku baxay ilmo kasta saddexda soonba waxaana ay markaa si wanaagsan u fahmi doonaan kharashka uu ku kacayo in ilmo kasta la gaarsiiyo adeegyada Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Waxaa loo baahan yahay in waqtiga ku habboon la helo maaliyadda Maalmaha Caafimaadka Carruurta si loo hubiyo in aaney sahaydu kala go'in, in qorshayahaasha hoose iyo tababarada iyo abaabulka bulshada la sameeyo. **Dadka oo aan xog sax ah laga hayn** ayaa ah culays isna wax u dhimey sameynta qorshayaasha hoose iyo qoondeynta kheyraadka. Maalmaha Caafimaadka Carruurtu waa barnaamij ku fadhiya tirada dadweynaha oo lagu higsanayo in lagu gaaro ilmo kasta iyada oo aan loo eegeynin heerkooda iyo xaaladahooda bulsho iyo dhaqaale (dadka gudaha ku barokacay iyo bulshooyinka martigeliyey, miyi iyo magaalo, gabdho iyo wiilal, reer guuraa iyo daaqsato). Guusha Maalmaha Caafimaadka Carruurtu waxa ay ku xiran tahay sida loo helo qorshayaal hoose oo taabogal ah oo heer degmo ah oo lagu tiriyo ilmo kasta iyo haweeney kasta oo ku nool tuulo kasta. Qiyaastii tirada dadka ee Maalmaha Qaranka ee Tallaalaka Cudurka Dabaysha ayaa loo adeegsaday sameynta qorshayaasha hoose Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Shaqaalaha barnaamijka cudurka dabaysha ee WHO oo si firfircoon oo heer walba ah uga qaybqaatey, gaar ahaan heer gobol iyo degmo oo ah halka ay qorshayaasha hoose ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta ay ka dhacaan, ayaa aad muhiim ugu ahaa habsami u fulinta Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Kooxda ayaa u adeegsatey waayo-aragnimadii ay ka heleen la dagaallanka cudurka dabaysha waxaana ay si dhow ula shaqeeyeen Wasaaradaha Caafimaadka ee Somaliland iyo Puntland. Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya halkaas oo qaab-dhismeedka Wasaaradda Caafimaadku uusan si weyn u shaqeyneynin, ayaa kooxda la dagaallanka cudurka dabaysha iyo shaqaalaha UNICEF ay si heer degmo ah ula shaqeeyeen la-hawgalayaal NGO-yo ah. Wadashaqeynta xooggan ee WHO iyo UNICEF Somalia ayaa mar labaad la muujiyey sidii horeba loogu muujiyey dadaalladii dabargoynta cudurka dabaysha.

Kheyraadka dadka oo yaraa gaar ahaan tallaalayaasha iyo **yaraantii qaboojiyeyaasha tallaalka** ayaa wax looga qabtey iyada oo loo marayo istiraatiijiyado ay ka mid ahaayeen hab marba hawsha meel laga qabanayo ama iyada oo la abaabulayo tiro badan oo shaqaale tababaran ah oo aan ka socon oo keliya waaxda caafimaadka ee ay ku jiraan kuwo bannaanka ka ah waaxda caafimaadka kuwaas oo ka qayb qaatey qorista dadka iyo abaabulka bulshada iyo bixinta Fitamiin A iyo goryaan ka-dilidda intii ay socdeen Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Hawsha oo marba meel laga qabanayey waxa ay suurtagelisey in qaboojiyeyaasha kaydka tallaalka hadba degmo la geeyo si loo hubiyo ammaanka tallaalka. Dhinaca farsamada, in kasta oo guud ahaan barnamaijku uu tiro badan oo haween ah gaarsiiyey tallaalka teetanada, haddana kooxaha ka shaqeynayey Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa ay arkeen in **Tallaalka Teetanada** ay goobaha qaar diideen haween iyo gabdho. Arrintan ayaa qayb ahaan keentey ogaal la'aanta dadka ee in Tallaalka Teetanada ay u baahan yihiin dhammaan haweenka ku jira da'dii carruur dhalista xataa kuwa aan la qabin iyo kuwa aan uurka lahayn waqtiga tallaalka. Arrintan ayaa tusineysa baahida loo qabo isgaarsiin hab-dhaqanka lagu beddelayo oo ballaaran oo joogtana ah iyo abaabul bulsho oo lagu beegsanayo ragga iyo haweenka oo ku saabsan faa'iidooyinka tallaalka teetanada.

Maxay carruurtu ugu dhintaan Soomaaliya?

Ka yimid bogga 1aad

Sidaa daraaddeed sababaha ay u dhintaan carruurta ayaa loo maleynayaa in ay u dhow yihiin kuwa ka jira xaaladaha goobaha uu horumarkoodu aadka u liito: shubanka, oof-wareenka, jadeecada, duumada (malaariyada) iyo nafaqo-yaraanka – iyo kuwo kale sida neef-xiranka, dhicinta, *sepsis-ka* iyo kojiyaha (teetanada). In kasta oo xaqiiqo la isku halleyn karo aan laga heli karin Soomaaliya, laakiin xogta caafimaadka ayaa tilmaameysa in sababaha ugu waaweyn ee carruurtu u silcaan ay la xiriiraan nafaqo-yaraan, cudurada shubanka, caabuqa neef-mareenka (gaar ahaan oof-wareenka), cudurada tallaalka looga hortegi karo iyo dhaawacyada.

Sanado ay dagaallo socdeen iyo oo ay hoos u dhaceen hay'adihii ayaa dhaliyey in xaaladda caafimaadka dadku ay aad hoos u dhacdo. Dadka badidoodu waa sabool aan waxba haysan waxaana ay gebi ahaanba ku tiirsan yihiin lacagta yar ee loo soo xawilo iyo gargaarka caalamiga ah – si kooban ayaana ay u gaari karaan nidaamka caafimaadka.

Nidaamka caafimaadka dadweynaha

Nidaamka caafimaadka dadweynaha ayaa kheyraadku ku yar yahay oo si aan dheelitirneyna u baahsan. Nidaamka caafimaadka dadweynaha ayaa la kufaa-kacaya si uu adeegyo u siiyo tiro kooban oo Soomaali ah kaas oo ay haystaan culaysyo duminaya: nabadgelyo-xumo; culayso juqraafi iyo dad reer guuraa ah; shaqaale aan habeysneyn oo tiradooduna kooban tahay oo ay jilib-xirtey dhiirigelin la'aan; hubaal la'aan ka jirta mustaqbalka siyaasadeed iyo kan maamulba; burbur maaliyadeed iyo mid hawlgal iyo macluumaadka iyo la-socoshada liidata. Caqabado caadi ah iyo kuwo maaliyadeed ayaa ka hortaagan in la soo gaaro adeegyada caafimaadka – nooliga iyo waqtiga gaadiidka ku baxa iyo sidoo kale fogaanta ay fog yihiin adeegyada markoodii horeba ay tayadoodu liidatey. Gaar ahaan waxaa raadintoodu ay aad u yar tahay adeegyada ka hortagga iyo kuwo kale oo uu ka mid yahay tallaalka. Intaa waxaa dheer in shaqaale-xumada, kormeer iyo sahay aan ku dad ku filneyn, iyo cusbitaallo dadka loo gudbin karo oo yar – ayaa nidaamka caafimaadka dadweynaha uu u bixiyaa adeegyo ay tayadoodu aad u yar tahay – sidaa ayaana ay dadku ugu kalsooneyn. Lafagurid sanadkii 2007 lagu sameeyey xogta caafimaadka ayaa tilmaantey in nisbada ka-faa'iideysashadu tahay 0.13 qofkii iyo sanadkii AMA in qofka Soomaaliga ah ee caadiga ahi uu xarun caafimaadka dadweynaha ah uu soo booqdo mar keliya siddeeddii sanaba! Sahamo kale oo kala duwan ayaa tusay in 50 – 75% dadka ay isticmaalaan farmashisheyaasha gaarka loo leeyahay iyo adeegyada caafimaadka ee gaarka loo leeyahay haddii iyo goorta ay isticmaalaan adeegyada daryeelka caafimaadka ee casriga ah – oo in ka yar 20% dadka ayaaba isticmaala adeegyada caafimaadka dadweynaha. ***Eeg bogga 3aad***

Waxa loo baahan yahay wacyigelin dheeri ah oo ku aaddan faa'iidada tallaalka teetanada…

Waxqabadyo nafaqeyn oo nafo-badbaadiya oo ay helaan carruurta Soomaaliyeed

CEEL-BERDE, Soomaaliya, 24 Juunyo 2009 – Salaadda horeba, barnaamijka quudin-ku-daweynta bukaan-socodka Ceel-Berde ayaa ay buuxinayaan haween iyo carruur daryeel-doon ah. Barnaamijka quudin-ku-daweynta ayaa ku dhex yaalla xarunta caafimaadka hooyada iyo dhallaanka si uu u daweeyo carruurta ay hayso nafaqo-xumada aadka u ba'an – taas oo ah xaalad nafta halis gelisa.

Shaqaalaha Barnaamijka Quudin-ku-daweynta ayaa aad ugu mashquulsan safafka dhaadheer ee hooyooyinka xambaarsan carruurtooda. Waxa ay cabbiraan joogga, culasyka iyo wareegga garabka ilmo kasta si ay u qiimeeyaan xaaladda nafaqo iyo midda soo kabsashada. Baaritaanno jireed oo lagu xaqiijinayo xaaladaha caafimaadka ayaa sidoo kale la sameeyaa.

Ceel-Berde, oo ku taalla meel u dhow xuduudda Itoobiya iyo gobolka Bakool ee koonfurta Soomaaliya, ayaa ka mid ah magaalooyinka ay imanayeen tiro sii kordheysa oo ah dad ku soo barokacay iskahorimaadyada.

Ilmo lagu miisaamayo xarunta quudin ku-daweynta ee Ceel Berde, Somalia.© UNICEF Somalia / 2009

Daryeelka iyo quudin-ku-daweynta

Hooyo Dahaba oo safka xagga hore kaga jirta ayaa tiri in ay Xarunta Quudin Ku Daweynta ay u timid in wiilkeeda Cali oo hal sano jira la baaro. Cali ayaa loo soo gudbiyey Xaruntan Quudin Ku Daweynta oo uu maamulo NGO-ga caalamiga ah ee *International Medical Corps* (IMC) oo ay taageerto UNICEF, markii la ogaadey in ay hayso nafaqo-xumo aad u ba'an. Dahaba ayaa xustey in ilmaheeda uu aad u baaba'sanaa dhowr bilood un ka hor.

"Cali aad buu u tabar darnaa una xanuunsanaa markii ugu horeysey ee aan halkaan keenayey," ayaa ay tiri iyada oo dib u gocatey. "Aad buu caato u ahaa. Aad ayaan uga welwelsanaa in uusan badbaadi doonin. Laakiin haddda aad ayuu u wanaagsan yahay oo kii aad ogeydba ma ahan. Shaqaalaha ayaa ii sheegey in toddobaadka soo socda ay noogu dambeyso in aan halkaan baaris ugu soo noqonno."

Ka dib markii ay toddobaad walba xaaladdiisa ay dib u eegayeen, ayna siiinayeen raashin *Plumpy'nut* (cunto loogu talogalay in lagu daweeyo nafaqo-xumada aadka u ba'an), Fitamiin A iyo daawooyin kale, ayaa shaqaalaha Xarunta Quudin Ku Daweynta waxa ay go'aansadeen in Cali uu caafimaaday uuna diyaar u yahay in la saaro.

Si looga hortago in xaaladdu ay tabteedii ku soo noqoto, Cali waxaa loo beddeli doonaa barnaamij ay UNICEF taageerto oo quudinta dheeriga ah halkaas oo bil walba lagu siin doono raashin isku-shiidan, xaaladdiisa ayaana lala socon doonaa ugu yaraan muddo saddex bilood ah.

Carruurta nugul

Carruurta sida Cali oo kale ayaa ah kuwa ugu nugul saameynta saboolnimada, haqab-beel la'aanta cuntada, la'aanta biyo ammaan ah oo la cabbo iyo iskahorimaadyada ka socda Soomaaliya. "Wiilkeyga aad ayuu u shubmayey waana uu bararey, sidaa daraaddeed ayaan halkaan u keeney…yacani Xarunta Quudin Ku Daweynta," ayaa ay tiri Xaliima, oo ah hooyada dhashey Axmed oo sanad jir ah.

Wiilkaa yar ayaa ay haysey cago-barar, oo ah xaalad uu jirku keydiyo biyo badan oo ka dhalata nafaqo-xumada ba'an iyo caabuq. Axmed oo si mug leh loo dabiibey ayaa si muuqata u soo wanaagsanaaday, waxaana dhowaan laga saari doonaa Xarunta Quudin Ku Daweynta.

Ballaarinta waxqabadyada nafaqeynta

"In kasta oo ay ka sii dartey xaaladda ammaanka ee Soomaaliya, haddana waxqabadyada nafaqeynta ee UNICEF ayaa sii ballaaranayey labadii sano ee la soo dhaafey iyada oo nisbooyinka nafaqo-xumada ba'an ee carruurta ay weli sarreeyaan oo aan ogaaneyno goobo yaryar oo ay ka jirto nafaqo-xumo aad u ba'an." Ayaa ay tiri Fitsum Assefa oo ah Khabiirad Nafaqeynta u qaabilsan UNICEF Soomaaliya. Marwo Assefa ayaa xustey in UNICEF ay ballaarisey tirada Xarumaha Quudin Ku Daweynta ee ay taageerto min 40 ilaa ku dhowaad 200. Hay'adda ayaa higsaneysa in ay sanadka 2009ka gaarto in ka badan 50,000 oo carruur ay hayso nafaqo-xumo ba'an ah.

"Warka wanaagsani waa in carruur ku sugan xaalad aad u cakiran aan gaarsiiney waxqabadkan nafta lagu badbaadinayo," ayaa ay tiri Marwo Assefa. "Laakiin baahiyaha ayaa sidoo kale weyn waxaana jira meelo yaryar oo ay ku sugan yihiin dad aad u nugul oo aan weli la gaarin, sababtuna waa nabadgelyo-xumada iyo in gargaarka bani'aadamnimada dadka la gaarsiin waayey."

Gargaar muhiim ah oo ay bixiyaan waalidiinta

UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa baahiyaha nafaqo ee carruurta Soomaaliyeed wax kaga qabanaya xirmo waxqabadyo ah oo ay ku jiraan quudin guud oo looga hortagayo nafaqo-xumo haleesha carruurta nugul, iyo weliba daaweynta nafaqo-xumada ba'an iyo tan dhexdhexaadka ah oo loo marayo Barnaamijyada Quudin-ku-daweynta, xarumaha baxnaaninta bukaan-jiifka iyo barnaamijyada quudinta dheeriga ah oo laga sameeyey guud ahaanba dalka.

Maxay carruurtu ugu dhintaan Soomaaliya?

Ka yimid bogga 2aad

Dhibaatooyinka bani'aadamnimada ee hadda jira

Dagaallada u dhexeeya ciidamada dowladda iyo kuwa mucaaradka ayaa sii xoogeystey ilaa horraantii bishii Maajo 2009ka. Iyada oo Muqdisho ay ahayd halkii ay ka dhaceen rabshadaha ugu xun, haddana dagaallada ayaa waxa ay ku faafeen dhowr meelood iyo magaalo oo ku yaalla koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, taas oo keentey in ay korodho dhibaatada rayidka soo gaarta, xadgudubyada xuquuqaha aadanaha, tiro cusub oo tiro badan oo barokacay, burburinta iyo la wreegidda hanti nolol-raadsi, iyo carqaladeynta hawlaha dhaqaalaha iyo ganacsiga – ayaa uga sii darey dhibaatooyinka bani'aadamnimada.

Waxaa jira dad aad u tira badan oo gudaha ku barokacay iyada oo in ka badan 211,000 oo qof ay ka soo qaxeen Muqdisho kaliya muddadii u dhaxay Maajo ilaa Luulyo 2009ka taas oo wadarta tirada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Soomaaliya ka dhigeysa mid ka badan 1.3 milyan oo qof. Abaarta ka taagan gobollada dhexe ayaa sii xumaaneysa, ka dib markii shan xilli oo isku xiga ay roobabkii baaqdeen. Ku dhowaad 60% dadka gobollada dhexe (Galgaduud iyo Mudug) ayaa lagu tilmaamey in ay laba mid haystaan, dhibaatooyin Cunto iyo Nolol-raadsi oo Ba'an ama Xaalado Bani'aadamnimo oo ay keeneen abaar, sicid-barar, iyo iskahorimaadyo, saameeyey dadka miyiga, kuwa magaalada iyo Dadka Gudaha Ku Barokacay.

Eeg bogga 5aad

UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa ka hortegaya nafaqo-xumada carruurta Soomaaliyeed…

Mucaarad isu beddeley halyeygii tallaalka

Faarax Maxamed oo konton iyo saddex jir ah, oo ku magacdheer 'Shacks' waxa uu shaqaale caadi ah ka yahay xarun caafimaad oo gaar loo leeyahay oo ku taalla dulleedada Garoowe, Puntland. 'Shacks' oo leh xaas iyo siddeed carruur ah, oo ay ku jiraan 3 ilmood oo ka yar shan jir, ayaa degaankaa looga yaqaaney in yahay waalid aad uga soo horjeeda tallaalka. 2008dii waqti uu socdey mid ka mid ah olelayaashii tallaalka cudurka dabaysha, ayaa Faarax uu gaashaanka u daruurey iskuday ay kooxaha degaanka ee tallaalka dabaysha iyo hogaamiyeyaal laga dambeeyo oo degaanka ka socda ay u booqdeen si loo tallaalo carruurtiisa. Haseyeeshee, waqtigaan, Faarax ayaa lagu arkay isaga oo hoggaaminaya kooxda waxqabadka degdegga ah ee Ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee dhowaan lagu soo gabagabeeyey Garoowe, isaga oo salaaddii maqrib ka dib la hadlaya ragga isaga oo kale ah oo u sharxaya waxa uu yahay Tallaalka Cudurka Teetanada ee haweenka iyo sida loogu baahan yahay in hooyooyinka iyo carruurta ka yar shan jirka ay uga faa'iideystaan Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Xaggan hoose ka akhri Faarax iyo qisadiisa…

****

"Markii iigu horeysey waxa aan Maalmaha Caafimaadka Carruurta ka maqley Ibraahim oo aan deris nahay oo iskaa-wax-u-qabso ugu shaqeeya ururka *Amin Women and Child Organization* [AWOC], oo ah NGO degaanka ah oo UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu ay ku hawlgeliyeen in uu degaanka ka fuliyo waxqabadyo u qareemeyn iyo abaabul bulsho isugu jira. Sida uu Ibraahim iigu sheegey waxa ay ahayd isaga oo igu yiri in Maalmaha Caafimaadka Carruurta ay khuseyn doonto carruurta oo keliya. Intii aan sheekeysaneyney, ayaa Raadiyo Daljir, oo ah idaacad degaanka ka furan uu sii daayey iidheh ku saabsan Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Ka dib markii aan dhegeystey iidhehda ayaa ay ii caddaatey waxa ay arrintu ku saabsan tahay: olole caafimaad oo lagu beegsanayo hooyooyinka iyo carruurta iyo in xirmada ay isugu jirto waxqabadyo dhowr ah.

Markii ay iidhehdu ka sii baxaysay, waxaa aan anniga iyo Ibraahim aan ka doodeyney xirmada Maalmaha Caafimaadka Carruurta gaar ahaan tallaalka cudurka teetanada, oo waxqabyada ka mid ahayn. Isaga oo ka ambaqaadaya farriintii ku saabsaneyd tallaalka teetanada, ayaa Ibraahim ii sheegey in xaaskiisu aaney weligeed qaadan tallaalka teetanada sababtuna ay tahay sheeko uu maqley oo ku saabsanayd sida ay xarun caafimaad ay dhowr haween ah ay uga dhigtey ma-dhaleys. Markii aan weydiiyey halka uu sheekada ka maqley, Ibraahim ma hayn xaqiiqooyin uu ku doodo. Waxaa uu sheegey, in uusan si wanaagsan u xusuusan cidda u sheegtey sheekada laakiin waxa uu sheegey in ay xaqiiq tahay waana uu ku dhaartey. Waa markaas markii aan u sharxay sida a uu tallaalka teetanada muhiim ugu yahay haweenka ku jira da'da dhalmada. Waxa aan ugu sharxay sidii ay Dr. Saafi, oo madax ii ah iigu sharaxday markii aan kula murmey khalad aan sidaas oo kale uga fahamsanaa tallaalka teetanada. Khaladka aan fahamsanaa waxa uu ahaa in tallaalku uu haweenka ka dhigayo in ay dhalaan gabdho oo keliya. Markii aan u sharxay Dr Saafi, waxa ay la yaabtey sida ay arrintaasi u sababi karo tallaalka teetanada. In kasta oo aniga oo cagajiif ka ah aan sano ka hor weydiistey xaaskeyga in ay iska soo qaadato tallaalka teetanada, waxa ay dhowaan dhashey ilmo caafimaad qaba oo wax dhibaato ahna kuma arkin ilmihii. Dr. Saafi ayaa ii sheegtey in tallaalka teetanada uu hooyada iyo ilmaha ka ilaalinayo in ay qaadaan Teetano. Waxa ay ii sheegtey in dalal badan tallaalka teetanada si joogto ah loo siiyo haweenka uurka leh, badanaaba waqtiyada ay helaan daryeelka ka horreeya dhalmada. Nasiib darro, dalka Soomaaliya ma lahan xarumo dad ku filan oo lagu bixiyo daryeelka ka horeeya dhalmada. Waxaa kale oo ay tiri in haweenka aan hore u soo qaadan tallaalka, ama aan haysan qoraal muujinaya in ay qaateen tallaalka, lagula talinayo in ay shan jeer qaataan: labo ka mid oo loo dhexeysiinayo hal bil waa in la siiyaa uurka ugu horreeya, iyo hal mid oo la siinayo uur kasta oo ka dambeeya (ama waqtiyada ku habboon), ilaa ay ka qaadato shan jeer.

Marka la siiyo haweeneyda ku jirta da'dii dhalmada, tallaalladaa kama ilaaliyaan teetanada haweeneyda qaadatey oo keliya, laakiin waxa ay sidoo kale ka ilaaliyaan in teetano uu qaado ilmaha dhasha ah, ayaan ku iri Ibraahim. Marka tallaalka teetanada la siiyo haweeney uur leh ama uur qaadaysa, unugyada difaaca ee uu jirkeedu sameeyo waxaa loo gudbiyaa ilmaha ku jiro uurkeeda. Unugyadan difaaca jirka waxa ay ilmaha ka ilaaliyaan teetanada marka uu dhalanayo iyo dhowr bilood oo ka dambeeya. Waxaa ay sidoo kale haweeneyda ka ilaaliyaan teetanada. Marka saddex-jeer la qaato tallaalka teetanada waxa uu ku filan yahay in uu haweeneyda iyo ilmaha uu teetanada ka ilaaliyo muddo shan sano ah. ugu badnaan marka shan jeer la qaato waxaa uu ka ilaaliyaa haweeneyda sanadaha ay wax dhaleyso oo dhan.

Markii uu waqtigaa dheer la sheekeysanayey Ibraahim, waxaa uu si toos ah iigu sheegey in isaga oo ka ambaqaadaya hadalka Dr. Saafi, uu bulshada ku faafin doono baahida loo qabo in haweenka ku jira da'da dhalmada ay qaataan tallaalka teetanada. Waxaa uu sidoo kale yiri baahida ay carruurta ka yar shan jirka u qabaan in ay helaan xirmada adeegyada ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta ay tahay mid lagamamaarmaan ah maaddaama uu ka calool xumaaday sawirrada carruur u dhintey iyada oo aan laga tallaalin jadeecada oo ka dhacdey magaalo ku taalla koonfurta Soomaaliya. Dhowr maalmood ka dib, Ibraahim ayaan u tagey oo waxa aan isla qorsheyney in aan bulshada ragga sideena oo kale ah aan u sharaxno baahida loo qabo in haweenka la siiyo tallaalka teetnada.

Faarax ayaa yiri: "Mid ka mid ah istiraatiijiyada aniga iyo kooxdeydu aan sameyney waa in aan ragga war gaarsiino ka dib salaadda maqrib. UNICEF ayaan weydiisaney in ay ina siiso agab, ku saabsan Tallaalka Teetanada oo aan adeegsanney markii aan la munaaqshooneyney kooxaha aan buugsaney. Istiraatiijiyaddeena iyada oo ka mid ahayd, waxa aan helney meelo u dhow masaajidka weyn halkaas oo aan fariisaney oo aan kula hadalney shakhsiyaadkii aan dooneyney in aan kala hadalno tallaalka teetanada ee haweenka. Mid ka mid ah su'aalaha aan weydiinney horaantii munaaqashooyinkeenu waxa ay ahayd mid aan ku ogaaneyney in ay xaas leeyihiin iyo in kale, markaa kuwa xaaska leh, waxa aan sii weydiiney su'aal ku saabsaneyd in xaasaskoodu laga tallaaley teetanada iyo in kale.

Kuwa aan xaasaskoodu weli qaadan tallaalka teetanada waxa aanu markaa kala hadalney baahida loo qabo in la tallaalo. Qaar ka mid ah dadkii aan la hadalney waxa ay xuseen in xaasaskoodu ay uur leeyihiin waxaana ay ka fekerayeen haddii ay weli jirto fursad ay ku qaadan karaan tallaalka teetanada. Waxaanu si joogto ah uga jawaabeysey su'aalo ay dadka qabeen xataa waqtigii Maalmaha Caafimaadka Carruurtu socdeen, waxaana la hubaa in dadaalladeenu ay wax ku kordhiyeen tirada haweenka ku jira da'dii dhalidda ee la gaarey, laakiin waxa aanu u sii baahannahay in aan sii wadno wargaarsiinta dadka annaga oo si hoose ula shaqeyneyna UNICEF si haween kale oo badan loo gaarsiiyo tallaalka teetanada."

Waxaa carruurtu ay degdeg ugu baahan yihiin olole ballaaran oo tallaalka jadeecada ah…

Kacaanka badbaadinta carruurta

Farsamooyin cusub oo lagu yareynayo geerida carruurta 5 jirka ka yar ayaa bilaabey in ay kacaamiyaan nidaamyada daryeelka caafimaadka ee dalalka soo koraya laga bilaabo 1960kii. "Kacaankii" badbaadada carruurta ee ugu horreeyey waxaa bilaabey James Grant (oo markaas ahaa agaasimaha guud ee UNICEF) sanadkii 1982. istiraatiijiyaddaa ayaa higsaneysey kor u qaadista la-socoshada korriimada, fuuq-celinta afka, naas-nuujinta iyo tallaalka.

Kacaankaa Badbaadada Caruurta ayaa si aad ah ugu guuleystey in uu helo taageero wadajir ah oo siyaasadeed, kheyraad (dhaqaale) iyo in xoogga la saaro sameynta waxqabadyo caafimaad oo taabogal ah oo habboonna kuna fadhiya xaqiiqooyin, iyo ugu dambeyntii isaga oo farsamooyin la tijaabiyey gaarsiiyey nidaamyada caafimaadka dadweynaha ee dalalka si kor loogu qaado badbaadada carruurta. In kasta oo ay taasi jirto, haddana dhaliilaha waxaa ka ay ka jireen dhinaca kheryaadka (dhaqaalaha) iyo dadaallada laga weeciyey dhisidda nidaamyo caafimaad oo qaran oo adkeysi iyo jiritaanba leh (oo loo weeciyey natiijooyin kooban oo "maangaabnimo" ku dhisan).

Haseyeeshee, natiijooyinkii markii ugu horreyseyba la gaarey ayaa aad u wanaagsanaa – iyada oo geerida carruurta ka yar shan jirka ay isdhintey ku dhowaad 2/3 meelood. Sanadkii 1960, waxaa la qiyaasey in 18.9 milyan oo carruur shan sano jir ka yar ay dhimanayeen sanad kasta; tiradaas ayaa la soo dhimey oo 9.7 milyan gaartey sanadkii 2005tii.

Si loo wanaajiyo badbaadada carruurta ayaa dadaal cusub la go'aansaday markii la sameeyey Yoolka Horumarka ee Kun-sanadka (4) oo lagu yareynayo geerida carruurta taas oo heshey dareen siyaasadeed oo caalami ah oo loo wada shaqeynayo si loo gaaro in geerida carruurta la dhimo 2/3 meel nisbadii 1990, marka la gaaro sanadka 2015. Bilowgii kacaanka badbaadada carruurta arrinta aan la hayn ee hadda la hayo waa qoraallo sayniseed oo ku saabsan ilaa xadka loo baahan yahay arrintaa (oo ay tusaale ahaan ka mid yihiin in la ogaadey si kor loogu qaado badbaadada carruurta, loo baahan yahay wax aan wax kaga qabanno geerida carruurta iyo in dadaalladaani ay toos ugu xiran yihiin yareynta geerida hooyooyinka).

Waxaa sidoo kale jirey horumar weyn oo laga sameeyey nafaqada iyo nadaafadda – taas oo aad u ballaarisey fahamkii aan u lahayn kaalinta weyn ee ay ku jiraan waxqabyada fayadhowrka iyo nadaafadda iyo sidoo kale nafaqada iyo duxda dheeriga ah ee gaarka ah oo lagu yareeyo geerida iyo silica/naafanimada ka xiriirka la leh nafaqada.

Sidaa daraaddeed kacaanka badbaadada carruurta ayaa noqdey ajende caafimaadka dadweynaha oo dhab ah waxaana uu ka weyn yahay mas'uuliyadda waaxda caafimaadka oo waxaa soo gelaya tallaaboqaad wax looga qabanayo waxyaabaha keena caafimaad xumada. Naqtiimo ballaaran oo xaqiiqo ku dhisan ayaa la sameeyey si loo qeexo "hagaha" badbaadada carruurta, nafaqeynta carruurta yaryar iyo kuwa roonroon iyo badbaadada hooyada iyo dhallaanka waxaana lagu daabacay *Lancet*.

Marka laga soo tago xaqiiqooyinka ina siiyey liiska waxqabadyada muhiimmadda leh – waxaa jira tiro badeecooyin iyo adeegyo cusub ah iyo sidoo kale waayo-aragnimooyin laga dhaxley fulinta barnaamijyada kuwaas oo noqonaya ajandayaashii mustaqbalka cilmi-baaris lagu sameyn lahaa oo lagu ballaarin lahaa kartida aan u leenahay in aan si weyn saameyn ugu yeelano badbaadada hooyada, carruurta dhasha ah iyo carruurta kale.

Hadda sawirku waa uu cad yahay – waa aan naqaannaa sababta ugu waaweyn ee geerida sababta – waxa aan naqaanaa sida dib loogu eego waxyaabaha dal gaar ku ah si aan ugu sameyno istiraatiijiyadaha ugu kharashka yar ee dalkaas ku habboon – waxaana aan haysanaa hababkala duwan oo loo gaarsiin karo barnaamijyada. Laakiin in kasta oo horumar weyn laga gaarey dhinaca aqoonta, haddana waxaa jirta in uu yar yahay ka faa'iideysiga (hore waxaanu u soo sheegney in si weyn loo wanaajiyey nisbooyinka geerida) qaar badan oo ka mid ah waxqabadyadan aasaasiga ah 42 dal oo ay ka dhacdo 90% geerida carruurtu – iyo in ay sii ballaaranayaan farqiyada u dhexeeya fursadaha badbaadada ee carruurta hodonka ah iyo kuwa saboolka.

Waa arrin aad muhiim u ah waana mas'uuliyad in aan tusno in aan awoodno in aqoontan dadaalka badan lagu gaarey aan u rogno tallaabo waxtar leh oo aan si weyn u yareyno geerida, silica iyo naafanimada carruurta – iyada oo weliba arrintaa loo sameeyo si kharashkeedu yar yahay. Guul dhab ah, kala duwan oo baahsan ayaa joogteyn karta dadaal siyaasadeed iyo kheyraad joogto ah oo muddo socda.

Baahidii waa ay jirtaa; waxaa jira fursado waxqabadyo taabogal ah oo suurtagalna ah; waxaa dadka lagu gaarsiin karaa kharash yar, oo weli waxqabadyadaan si ku filan dadka looma gaarsiin – sidaa daraaddeedna waxaa jira baahi loo qabo in tallaabo la qaado!

Maxay carruurtu u dhintaan?

Ka yimid bogga 3aad

Sahamadii nafaqeynta ee Maajo 2009ka ayaa xaqiijiyey in xaaladda nafaqo ee dhammaan kooxaha ay weli ka sarreyso nisbada ugu hooseysa ee la filan karo marka ay xaaladaha degdegga ahi jiraan, iyada oo nisbooyinka nafaqo-xumada guud ay u dhexeeyaan 15.3% iyo 18.0% iyo nisbooyinka nafaqo-xumada aadka u ba'an ay u dhexeeyaan 2.6% iyo 5.5%. Waxaa jirta abaar ka soo socota waqooyiga gaar ahaan gobollada Sool, Sanaag iyo waqooyiga-bari ee Togdheer, taasna ay sabab u tahay roobabkii dhowaan baaqdey, oo ugu darsamey saddex xilli oo hore oo ay roobabku yaraayeen. Natiijooyinka ka dhashey ayaa ah kuwaan soo socda:

- Dadka Soomaaliyeed waxaa muddooyin dheer haystey wax la'aan iyo hoos u dhac bulsho. Intaa waxaa dheer, waxaa hadda haysta masiibooyin siyaasadeed, dhaqaale iyo kuwo dabiici ah oo sii kordhaya kuwaas oo abuuray dhibaatooyin adag oo degdeg ah iyo dhibaatooyinkii dabadheeraa oo iyaguna sii socda. Natiijaduna waa in haweenka iyo carruurta Soomaaliyeed ay iyaga oo tiro badan u dhimanayaan dhibaatooyinka caafimaadka aasaasiga ah, taasna ma ahan arrin la aqbali karo.
- Waxaa jira kheyraad bulsho oo aad u yar oo lagu horumarin karo nidaam caafimaad bulsho oo shaqeynaya.
- Xarumaha caafimaadka bulshada ee hadda jira ayaa ku shaqeeya heerar hoose sidaa daraaddeedna ma bixiyaan adeegyo tayo ahaan dadka ku filan – mana la soo wada gaaro si ay Soomaalida u siiyaan fursado adeegyo dad ku filan.
- Si loo bixiyo barnaamij ballaaran oo lagu badbaadinayo carruurta waxaa loo baahan yahay in dadka si dhab ah loo wada gaaro – nidaamka caafimaadka bulshadu ma bixinayo fursaddaan waqtigaan hadda la joogo ama mustaqbalka dhow.

Eeg bogga 6aad

Caqabado caadi ah iyo kuwo maaliyadeed ayaa dadka ka hortaagan adeegyada caafimaadka…

Xirfadaha dad la-dhaqanka oo loo adeegsado abaabulidda bulshada ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta

Caasha oo soddon iyo toddoba jir ah, waa madaxa koox u qaabilsan abaabulka bulshada NGO degaanka ah, oo la yiraahdo HODMAN Relief & Development Organization oo ay UNICEF hawlgelisey si uu bulshada ugu abaabulo Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Waqooyigabari ee Soomaaliya ('Puntland'). Waayo-aragnimada kooxdeenu u leedahay Xirfadaha Dad La-Dhaqanka oo loo adeegsado abaabulka bulshada ee Boosaaso, oo ah magaalo-madaxda ganacsiga ee Puntland ayaa hoostan lagu iftiimiyey.

Maalin aad u kulul oo aaney qoraxduna caad lahayn, ayaa Ifraax Maxamed oo 47 jir ah ku soo biireysaa haween u soo tukubaya goob ololaha Maalmaha Carruurta Caafimaadka laga fulinayo. Haweenka qaarkood carruur ayaa ay dhabarka ku sidaan qaarna waa soo lugeysiinayaan. Inta ay u soo socdaan goobta, waxa ay hoos u jiibinayaan iidhehda idaacadda degaanku ay u sameysey Maalmaha Caafimaadka Carruurta taas oo toddobaadyadii u dambeysey laga sii deynayey idaacadda uu qof kasta oo Boosaaso ku nool ku heesayey.

Heesta ayaa weydiisaneysa hooyooyinka iyo carruurta in ay soo booqdaan xarumaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee degaanka si ay u helaan xirmooyinka Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Iidhehda waxaa wada sameeyey UNICEF iyo idaacad degaanka ku taalla oo la hawlgasha, *Horseed Media*. Iidhehda Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxaa ku jira farriimo la wada xiriira xirmada Maalmaha Caafimaadka Carruurta uu Sheekh, Waalid, ilmo yar iyo hooyo iyo kuwo kale, ay ku weydiisanayaan dadka kala duwan in ay tagaan goobaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee ugu dhow si ay u helaan xiramada Maalmaha Caafimaadka Carruurta.

Inta Iftaax iyo saaxiibadeed ay ku soo dhowaanayaan goobta Maalmaha Caafimaadka Carruurta, waxa ay la kulmayaan koox ka mid ah kuwa abaabulka bulshada oo ku jirta hawsheedii. Abaabulayaasha ayaa wareegaya iyaga oo ogeysiisyo ku saabsan Maalmaha Caafimaadka Carruurta ka sii deynaya cod-baahiyeyaal ay sitaan. Waxaa ay ka socdaan NGO degaanka ah, HODMAN. Abaabulaha ugu weyn waa Caasha, oo ay Eeddo u tahay Ifraax oo ku nool guri goobta u dhow.

"Waxa aan booqaneyney xubnaha bulshada labadii toddobaad ee la soo dhaafey annaga oo la hadleyney dadka oo ku wargelineyney Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee soo socda," ayaa ay tiri Caasha. "Qaar ka mid ah xubnaha bulshada markii hore ma ayan fahamsaneyn fikradda ka dambeysa Maalmaha Caafimaadka Carruurta sababta oo ah waxay u maleynayeen ololihii cudurka dabaysha laakiin markii aan u sharaxney xirmada iyo sababaha loo qabanayo, waa ay fahmeen waxaana ay oggolaadeen in ay ka soo qaybgalaan Maalmaha Caafimaadka Carruurta."

Caasha waxa ay intaa raacisey in kooxdeeda oo lahayd xirfado dad la-dhaqan oo aad u wanaagsan ay u fududeysay hawshii kooxdeeda iyada oo UNICEF ay siisey casharro ku saabsan Maalmaha Caafimaadka Carruurta iyo sida loo xoojinayo abaabulka iyada oo la adeegsanayo xirfadaha dad la-dhaqanka.

"Wax ka dhaadhicinta bulsho xabnaheedu aaney fahamsaneyn baahida waxqabadyadan nafaha badbaadiya ma ahayn arrin fudud. Waxa ay diiraddu inoo saarneyd bulshooyinka aan u soo bixin ololayaashii hore ee kan la mid ahaa. Waxqabyadeena waxaa ka mid ahaa beeninta fahamka ay dadka qaar ka qabaan in qaar ka mid ah waxqabadyada nafaha lagu badbaadinayo sida tallaalka ay leeyihiin dhibaatooyin," ayaa ay tiri Caasha.

"Marka aan qoys u tagno oo aan la wadaagno macluumaadkii aan casharadii UNICEF ka helney, waxa ay si fudud u fahmayaan tirooyinka carruurta iyo haweenka ah ee u dhimanaya cudurada laga hortagi karo."

Xirfad ka mid ah dad la-dhaqanka ee aad loo adeegsado waa tan *su'aalo weydiinta* si loogu dhiirigeliyo daryeelayaasha iyo ilaaliyeyaasha carruurta si macluumaad dheeraad ah looga siiyo halka looga baahan yahay si loo caddeeyo arrimihii la soo qaaday intii lala sheekeysanayey. Farsamadan ayaa u baahan xirfad iyo adeegsiga ereyo ku habboon si looga fogaado in uu hadalkaagu u ekaado dhaliil.

Maaddaama ay hawsha fulinayaan Soomaali aqoon u leh dhaqankooda, waxa ay markaa awoodaan in ay si habboon u adeegsadaan hadalkooda iyo codkooda. Farsamadan ayaa bannaanka u soo saartey waxyaabaha laga aaminsan yahay waxqabadyada caafimaadka, sidaa daraaddeedna ku hoggaamisey abaabulayaasha in ay sharaxaan waxqabadyada Maalmaha Caafimaadka Carruurta. "Haddana, waxaa jira daryeelayaal carruur oo markii ay ku qanceen arrinta oggolaadey in ay ku soo biiraan kooxaha abaabulka si ay arrinta ugu qareemeeyaan. Kooxaha ayaa ay ku soo biiraan si ay hoggaamiyeyaasha bulshada iyo hay'adaha ugala hadlaan Maalmaha Caafimaadka Carruurta, mararka qaar iyaga oo xusaya tusaalooyin dhibaatooyin ka soo marey oo dad ay jeclaayeen ay ugu dhinteen xaalado cuduro laga hortegi karey," ayaa ay tiri Caasha.

Maxay carruurtu u dhintaan?

Ka yimid bogga 5aad

- Guud ahaan dadka Soomaaliyeed aqoon uma lahan sida kor loogu qaado caafimaadka carruurta iyo marka la doonanayo daryeel caafimaadka – dadku soo doontaan adeegyada caafimaadka gaar ahaan kuwa ka hortagga sida tallaalka oo kale.

Maxaa xal ah

UNICEF ayaa diyaarisey qorshe istiraatiijadeed oo sida ugu badan loogu yareynayo geerida, silica iyo naafanimada hooyada, dhasha iyo carruurta. Waxaana ka mid ah arrimahan soo socda:

1. Wargaarsiin ballaaran oo kor loogu qaadayo aqoonta dadka Soomaaliyeed taas oo ay ku wanaajinayaan hab-dhaqankooda oo korna loogu qaadayo badbaadada dhasha iyo carruurta iyo in lagu dhiirigeliyo in ay dad badan soo doontaan oo ay si wanaagsanna uga faa'iideystaan adeegyada caafimaadka.
2. Maalgelinta macluumaad caafimaad oo wanaagsan si kor loogu qaado go'aan gaaris ku saleysan xaqiiqada la ogaaday.
3. Gaarsiinta xirmo waxqabadyada badbaadada carruurta ah oo kharashkeedu yar yahay oo adeeg ahaanna fudud (waxqabadyo caafimaad, nafaqo iyo kuwo nadaafadeeed) iyada oo ololayaal lagu gaarsiinayo tuulooyinka iyo abaabulka bulshada si kor loogu qaado ka soo qaybgalka iyo fahamka (dadka laguma wada gaari karo xarumaha caafimaadka oo keliya. Istiraatiijiyadda waxaa lagu hirgelinayaa Maalmaha Caafimaadka Carruurta.
4. In diirradda la saaro xarumo caafimaad oo tiro yar si kor loogu qaado (shaqaalaha, adeegyada, daawooyinka) si loo hubiyo in ay bixiyaan adeegyo tayo dad ku filan leh oo kharashaadkoodu yar yahay oo ay ku awoodaan bixinta baahiyaha dadweynaha (ugu yaraan meelaha ay dadku ku badan yihiin) iyo in diiradda la saaro cusbitaallada dadka loo soo diro oo heerkoodu sarreeyo.
5. Qorshe cilmi-baaris hawlgaleed oo lagu wanaajinayo fahamkeena ku aaddan waxqabyada ugu muhiimsan ee laga fulin karo xaaladda Soomaaliya.

Wargaarsiinta bulshooyinka ayaa muhiim u ah guusha Maalmaha Caafimaadka Carruurta…

Soomaaliya—Dhulka lagu gaarey maalmaha caafimaadka carruurta

Soomaaliya – waa mid ka mid ah goobaha ay noloshadoodu ugu adag tahay dunida – waxa ay leedahay deegaan adag oo culays weyn ku ah bulshada marka laga hadlayo badbaadada caadiga ah. Isaga oo ay isu biirsadeen dhul badidiisu oomane yahay, dhul ahaan adag oo dadkuna ay ku yar yihiin, oo degsiimooyinkuna ay ku baahsan yihiin dhul aad u kala fog, oo ay u weheliso maqnaanshaha kaabayaasha (waddooyin, koronto iyo sahay biyo la cabbi karo) oo macnaheedu yahay in dadweynuhu aaney haysan wixii ay u baahnaayeen.

In kasta oo culaysyadani jiraan, haddana waxaa jira guulo la gaarey. Soomaaliya ayaa xakameysey fayruska cudurka dabaysha ilaa Maarso 2007dii waxaana ay hoos u dhigtey xaaladaha cudurka jadeecada ee carruurta ka yar shan jirka min 12,008 oo sanadkii 2004tii ahayd ilaa 1,081 oo sanadkii 2008da. Badi guulahani waxaa lagu gaarey iyada oo adeegga toos loo siiyey bulshooyinka, tusaale ahaan ololayaashii jadeecada oo lagu gaarey malaayiin carruur ah iyo maalmaha tallaalka qaranka ee tallaalka dabaysha oo qayb ka qaatey gaaritaankii Soomaaliya xor ka ah cudurka dabayshaa, taas oo ah guul aad u weyn marka lagu xisaabtamo xaaladaha dhaba ah ee Soomaaliya ka taagan. Iyada oo qayb ka ah guud ahaan barnaamijka wadajirka ee UNICEF iyo WHO ee Soomaaliya ee Dardargelinta Badbaadada Carruurta Yaryar, ayaa labada hay'adood oo taageero ka haysta Wasaaradaha Caafimaadka iyo maamullada degaannada oo ayna iskaashanayaan NGO-yo ay Maalmaha Caafimaadka Carruurta bilaabeen Disembar 2008dii.

Maalmaha Caafimaadka Carruurta – oo ah in muddo ka dibba la xoojiyo tallaalka joogtada ah oo ay la socoto nafaqeyn- ayaa ah dib-u-cusbooneysiinta dadaallada lagu kordhinayo gaarsiinta waxqabadyada ugu muhiimsan ee raadka ugu sarreeya ku leh caafimaadka la gaarsiinayo tirada ugu badan ee carruurta ee la gaari karo iyada oo la adeegsanayo istiraatiijiyado nooc olole ah. Xirmooyinka Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxaa ku jira waxqabyada ugu muhiimsan ee badbaadada carruurta ee raadka weyn reeba sida tallaalka (jadeecada, Qummanka, Xiiq-dheerta iyo Teetanada iyo tallaalka cudurka dabaysha ee afka laga qaato), Fitamiin A, goryaan ka-dilid, cusbada fuuq-celinta afka, kiniiniyada nadiifinta biyaha, iyo baaritaanka nafaqada ee lagu beegsanayo carruurta ka yar shan sano jirka iyo sidoo kale tallaalka teenada oo la siiyo haweenka ku jira da'da dhalmada.

Wareeggii koowaad ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa uu Waqooyi-galbeed Soomaaliya ("Somaliland") ka bilowday toddobaadkii ugu dambeeyey bishii Disembar 2008dii halkaas oo uu ka socdey ilaa bartamihii Febraayo 2009. Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya waxa ay Maalmaha Caafimaadka Carruurta ka dhaceen bishii Maarso ilaa horraan Maajo 2009 (marka laga reebo gobollada Banaadir iyo Shabeellaha Hoose iyo degmada Ksmaayo) waxaa Waqooyi-Bari Soomaaliya ("Puntland" ay ka dhaceen bilihii Maajo iyo Juunyo 2009ka.

Ilaa hadda, in ka badan hal milyan oo carruur ah iyo qiyaastii 800,000 oo ah haween ku jira da'dii dhalidda ayaa ay Maalmaha Caafimaadka Carruurtu gaareen. Shaxda ku taalla Bogga 8aad ayaa muujinaysa tirada lagu gaarey Somailland, Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya (marka laga reebo gobollada Banaadir, Shabeellaha Hoose, iyo degmada Kismaayo) iyo Puntland.

Shaxda waxa ay muujineysaa guul weyn oo la gaarey taas oo aad uga sarreysa wixi uu barnaamijku ku gaarey waxqabyadyadii barnaamijka tallaalka la ballaariyey ee joogtada ah ee sanadkii 2008da. Tusaale ahaan, tirada tallaalka jadeecada lagu gaarsiiyey Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa ay ku dhow yihiin toban-laab tallaaladii jadeecada ee lagu gaarey barnaamijyada tallaalka ee caadiga ah ee xarumaha caafimaadku ay bixiyeen 2008dii oo dhan. Sidaa daraaddeed, isbarbardhiggan ayaa si cad u iftiiminaya kumanaanka dheeriga ah ee carruurta iyo haweenka ee lagu gaarayo Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Tirooyinkaan ayaa ah kuwo tilmaan keliya ah – ilma kasta iyo haweeney kasta oo lagu gaarey Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa ay heleen xirmo adeegyo ah ee ma helin oo keliya tallaaka jadeecada ama tallaalka teetanada!

Si loo joogteeya gaaritaankaa iyo si wax looga qabto silica iyo geerida carruurta, Maalmaha Caafimaadka Carruurta ayaa la qaban doonaa lix-biloodba mar. Iyada oo Maalmaha Caafimaadka Carruurta la qorsheeyey in ay dhacaan lixdii biloodba mar, ayaa UNICEF iyo WHO waxa ay hubin doonaan in taageero ku habboon ay helaan barnaamijyada tallaalka caadiga ah iyo dareelka xarumaha lagu bixiyo oo ay ka mid yihiin qalabka kaydka tallaalka, taageerada iyo kormeerka shaqaalaha, abaabul iyo wargaarsiin bulsho oo taabogal ah si loo kordhiyo waxqabadyada badbaadada carruurta ee ugu muhiimsan ee ay helaan carruurta iyo qoysaska.

Waxqabadyada carruurta ayaa ay si wanaagsan u arkeen bulshooyinka, qoysaska iyo shaqaalaha caafimaadka. Maamullada iyo sidoo kale bulshooyinka ayaa ku farxay in ay arkaan waxqabad dhab oo la taaban karo oo ay helaan dadkooda. Shaqaalaha caafimaadka ayaa ay dhiirigeliyeen hawlaha dardarta ku socda iyo faa'iidada sarreysa ee lagu gaarey dadaalkooda waxaana jirta in dadweynuhu ay si cad u soo dhoweeyeen bixinta adeegyada aasaasiga ah ee lacag la'aanta ah, taas oo ay ka markhaati kacayso sida ballaaran ee qoysaska iyo carruurtu uga soo qayb galeen.

Haweeney laga tallaalayo teetanada intii uu socdey ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliya. © UNICEF Somalia/2009.

Wareegga xiga ee Maalmaha Caafimaadka Carruurtu waxaa loo qorsheeyey sidan soo socda: Somaliland bisha Agoosto 2009, Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya bilaha Oktoobar/Nofembar 2009 iyo Puntland bisha Disembar 2009.

Maalmaha Caafimaadka Carruurta ayaa la qaban doonaa 6dii biloodba mar si loo joogteeyo waxtarkooda…

Hirgelinta Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliya



Dis. 08 – Feb. 09
Maarso – Abriil
Abriil - Maajo
Maajo – Juunyo
Lama hirgelin

Waxqabadka	Da'da	Tirada la gaarey*	Qiyaasta la gaarey (waxa ay ku fadhidaa tirada dadka ee UNDP bixisey)**
Tallaalka Dabeysha (OPV)	Carruur jirta 0-59 bilood	1,072,179	**85%**
Tallaalka jadeecada	Carruur jirta 9-59 bilood	899,789	**84%**
Tallaalka DPT 1-3	Caruur jirta 6 toddobaad – 11 bilood	245,655	**98%**
Fitamiin A dheeri ah	Carruur jirta 6-59 bilood	937,184	**83%**
Goryaan ka-dilid (*Albendazol*)	Carruur jirta 12-59 bilood	839,512	**83%**
Tallaalka Teetanada 1-5	Haween ku jira da'dii dhalmada	802,142	**55%**
Cusbada Fuuqcelinta Afka (ORS)	Carruur jirta 0-59 bilood	1,073,727	**85%**
Kiniiniga biyaha ee Aquatab	Carruur jirta 0-59 bilood	1,082,063	**86%**

*Waxaa ka mid ah laba maalmood oo dhammeystir ahaa oo laga fuliyey Hargeysa, Waqooyiga Galbeed ee Soomaaliya ('Somaliland').
**Boqolleyda waxa ay ku dhisan tahay degaannadii la gaarey Maalmihii Caafimaadka Carruurta, waxaana ka maqan dadkii lagu beegsaday gobollada Banaadir, Shabeellaha Hoose iyo degmada Kismaayo, halkaas oo Maalmaha Caafimaadka Carruurta looga fulin waayey nabadgelyo-xumada daraaddeed.

Dadaal dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo wanaajiyo badbaadada carruurta Soomaaliyeed *Ka yimid Bogga 1aad*

Warsidahan waxaa lagu koobey arrimaha la xiriira Badbaadada Carruurta gaar ahaanna waxaa diiradda la saarey Maalmaha Caafimaadka Carruurta; raadraaca iyo taariikhda, guulaha la gaarey wejigii koowaad ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliya, culaysyadii lala kulmey iyo tubta mustaqbalka. Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa ay muujinayaan xaqiiqada ah in natiijooyin laga gaari karo carruurta xataa marka deegaanku uu adag yahay haddii aan iskaashanno. Waxa aan jeclaan lahayn in aan fursaddaan uga faa'iideysanno in aan u mahadcelino madaxda caafimaadka dadaalkoodii iyo taageeradoodii Maalmaha Caafimaadka Carruurta, NGO-yada nala hawlgaley aan uga mahadcelino iskaashigii ay muujiyeen iyo bulshooyinka iyo waalidiinta keeney carruurtooda si loo tallaalo oo ku caawiyey in kooxihii ay waajibaadkooda gutaan.Maalmaha Caafimaadka Carruurta ma suuroobi lahayn haddii aan la helin dadaalkii joogtada ahaa. Waxa aan sidoo kale jeclaan lahayn in aan u mahacelinno deeq-bixiyeyaashii qaaraankoodu uu suurtageliyey in Maalmaha Caafimaadka Carruurta lagu xaqiijiyo Soomaaliya. Waa iskaashigan kan aan ku xaqiijineyno in ay socdaan dadaalladeena aan ku dooneyno in aan ilmo kasta ku gaarsiino waxqabadyadan aad saameynta wanaagsan u reeba!

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan barnaamijyadeena ama si aad u ogaato gacanta aad geysan karto fadlan la xiriir:

Rozanne Chorlton, UNICEF Representative	**rchorlton@unicef.org**	**+ 254 722 514 569**
Dr Marthe M. Everard, WHO Representative	**everardm@nbo.emro.who.int**	**+ 254 738 816 400**
Dr Abraham Mulugeta, WHO Polio Team Leader	**abrahamm@nbo.emro.who.int**	**+ 254 724 259 813**
Denise Shepherd-Johnson, UNICEF Chief of Communication	**dshepherdjohnson@unicef.org**	**+ 254 722 719 867**
Robert Kihara, UNICEF Communication Officer	**rkihara@unicef.org**	**+ 254 722 206 883**